



14ka September 2019

**Hadal Qoraalka Shirka Golaha Wasiirada Maaliyadda ee Dalka, (Ad hoc meeting),
Addis Ababa,**

Horudhac:

Shir ay isugu yimaadeen Golaha Wasiirada Maaliyadda dalka iyo Gobolka Banaadir ayaa ka dhacay Ethiopia, Addis Ababa 14ka bisha September, 2019, si loo lafa-guro loogana wada hadlaan arrimaha la xiira maamulka iyo maaliyadda dalka, lana turxaan bixiyo habsami u socodka hawlaha maaliyadda dalka.

Shirka waxaa si gaar ah diiradda looga saaraayay agendayaasha hoos ku xusan:

Agendaha Shirka Golaha Wasiirada Maaliyadda iyo Gobolka Banaadir

- 1) Ka wada hadlidda hawlaha maaliyadda iyo dar-dargalinta habsami usocodka hawlaha maaliyadda dalka;
- 2) Ka wada hadlidda qaybsiga shaqooyinka (Expenditure Assignment) ee la xiriira hawlaha maaliyadda iyo qaybsiga lacagaha deeqada dibadda oo ay ka mid tahay EU budget support, IWL

Agandaha 1aad: Dood iyo falaqan dheer ah ka dib, agendaha 1aad waxaa lagu heshiyay qodoboda soo socoda

- Shuruucda Maaliyadeed, (6 sharci oo maaliyadeed)in la isaga yimaado dib-u-eegisna lagu sameeyaa lana mideeyo dhamaan shuruucda maaliyadeed ee dalka;
- Sharciga dakhliga maadama uu hadda ka wada halkiisa uu socdo, kuwa haray waa in madal la isugu yimaadaa oo la iska arkaa;
- Heshiiska qaybsiga dakhliga kalluumaysiga in markale la isaga yimaado, wasiiradaha maaliyadana door ay ka qaataan habka qaybsiga dakhliga kalluunka;
- Heshiisyadii horay loo galay dhaqan-galintooda waa in la fuliyo;
- In la xoojiyo mabda' fiscal federalism lana sameeyo documents budhig u ah;
- In DXDFS ay qayb ka noqdaan shirarka SMP-ga looga hadlo;
- In la helo hab wax lagu qaybsado (criteria) wax lagu qaybsado oo (dhab) kuna salaysan wax la isla ogolyahay;
- Shirku wuxuu isla ogolaaday habraaca loo sameeyo lacagaha loo diro DXDFS (transfer) ee ku cad policy paper horay qolooyinka farsamada ugu wada hadleen in Golaha uu ansixiyo;
- In la sameeyo WhatsApp group oo wasiiradu ku wada socdaan;
- In Wasaaradda Maaliyadda Federaalka ay DXDFS mar ku tagto safaro shaqo oo hogaaminayo Wasiirka Maaliyada;
- In aan la siyaasadayn ballamada iyo kulamada Wasiiradaha Maaliyadda;
- In DXDFS loo sameeyo barnaamij reform ah oo benchmark ku salaysan;
- Hadal qoraalka (Minutes) shirkaan waxaa lala share gareyn doonaa EU, IMF iyo WB;

Handwritten signatures and initials in blue ink, including the letters 'WB' at the bottom left.









Agendaha 2aad: Qaybsiga lacagaha deeqda dibadda – Xubnaha Wasiirada Maaliyadda ee shirka ka soo qayb-galay dood dheer ka dib waxay isla qaateen qodobada hoos ku xusan

- Sida lagu cadeeyay habraaca documents expenditure assignments, waxaa lagu heshiyay lacagta transfer DXDFS loo diro in 2/3 ka mid ah shuruud ku xurantahay laguna finance gareeyo arrimaha Bulshada iyo Amniga;
- Qaybsiga lacagaha deeqda dibadda waxaa lagu heshiyay in 40% loo qoondooyo DXDFS, 60% loo qoondooyo DFS;
- In guddi farsamo ah loo saaro qaybsiga lacagaha dibadda wixii maanta ka dambeeya
- Wasiirka Maaliyadda wuxuu si dhaqsi ah u dirayaa warqad mudaysan oo ku aadan sii daynta lacagta

Gabo-gabo: Shirka ugu horeeya Wasiirada Maaliyadda waa in lagu qabto Kismaayo

Shirka waxaa la soo xiray 6:00pm.

Magacyada Xubanaha Wasiirada Maaliyadda iyo Gobolka Banaadir ee Shirka ka soo qayb-galay:

1. Xasan Shire Cabdi Wasiirka Maaliyadda Puntland 
2. Cabdirashid Jire Qalinle Wasiirka Maaliyadda Jubbaland 
3. Axmed Maxamed Xuseen Wasiirka Maaliyada K/Galbeed 
4. Cabdishakuur Abuukar Wasiirka Maaliyada Hirshabele 
5. Saciid Siyaad Shirwac Wasiirka Maaliyadda Galmudug 
6. Ibraahim Mahadale G/K. Gobolka Banadir Arr. M &M 
7. Maxamed Cabdulqadir Cisman Wasiiru Dowlaha Maaliyadda Puntaland 
8. Cabdirashid Axmed Xasan Wasiir K/Xigeenka Maaliyadda K/Galbeed 
9. Cabdiraxmaan Ducaale Bayle Wasiirka Maaliyadda Dowladda Federaalka Soomaaliya 